

Xaanshida Tilmaamaha Badqabka ee Janitorial

Taxanayaasha tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka si looga hortago dhaawacyada shaqada kadhasha ee warshada janitorial



Agoosto 2020

Soo Baxay 2, Nuqulka 7



Naftaada Ilaali Marka aad Shaqada Joogtid: Sida Loo Nadiifiyo Loona Dilo Jeermiska COVID-19 (Fayraska Korona)

Shaqaalaha ka shaqeeya nadaafadda dhismayaasha/gacanta ku haya ayaa safka hore kaga jira gacan ka geysashada xakameynta faafitaanta cudurka COVID-19 iyo fayrasyada kale ee waxyeellada leh. Baro sida loo nadiifiyo oo jeermiska looga dilo goobaha, si loo yareeyo halista caabuqa. Hoos waxaa ku qoran xoogaa talooyin a oo mudan in la xusuusnaado.

Iyada oo ku xiran nooca xarunta:

- Xir goobaha ay adeegsadaan dadka xannuunsan, oo
- Sug ilaa iyo inta suuragal ah (ilaa iyo 24 saacadood) ka hor inta aadan bilaabin nadiifinta iyo jeermis-kadilista goobaha ay adeegsadaan dadka xannuunsan.
- Fur albaabada iyo daaqadaha dibedda si aad u kordhiso wareegga hawada ee goobta.
- Hubso in aad haysato oo aad adeegsato dhammaan qalabka difaaca qofka (PPE) ee loo baahan yahay – sida af-xirka, gacmo-gashiyada, iyo dilaaca indhaha.
- Nadiifi oo jeermiska-ka-dil goobaha oo dhan (tusaale, xafiisyada, musqullaha, iyo goobaha la wadaago) oo ay adeegsadaan dadka xannuunsan.
- Diirrada saar gaar ahaan sagxadaha inta badan la taabto.
- Haddii sagxadaha ay wasakh yihiin, marka hore nadiifi adiga oo adeegsanaya warankiilo ama saabuun iyo biyo, ka-dibna jeermiska ka dil.



Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato daraasada, wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP
360-819-7908 ▪ 1-888-667-4277 ▪ JanitorStudy@Lni.wa.gov
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-72-2020





Kala duwanaanshaha:



Nadiifi: waxaa loola jeedaa in aad wasakhda iyo waxyaabaha kale ka qaado sagxadaha.

Jeermiska-ka-dil: waxaa loola jeedaa adeegsiga kiimiko lagu dilayo jeermiska sagxadaha saaran.

Sida jeermiska loo dilo:

- Adeegso milanka warankiilada guryaha oo barxan, ama
- Milan aalkolo oo ku jirto ugu yaraan aalkolo 70%, ama
- Inta badan jeermis-dilayaasha guryaha caamka ah ee ka diiwaangashan EPA ayaa ah kuwo waxtar leh.
- Raadi oo adeegso [kiimikooyin iyo hab-dhaqanno ammaan ah marka aad wax nadiifinayso oo aad jeermiska ka dilayso.](#)
- **Milanada warankiilo la barxay** ayaa la adeegsan karaa haddii ay ku habboon yihiin sagxadda.
 - **Weyddii** kormeerahaaga ama maamulahaaga in uu go'aamiyo kiimikooyinka iyo halka lagu adeegsanayo.
 - **Raac** tilmaamaha adeegsiga ee soosaaraha waxaadna habsataa in aad haysato hawo habboon.
 - **Eeg** si aad u hubiso badeecada in aysan dhaafin taariikhda dhacitaankeeda.
 - **Marnaba ha isku qasin warankiillada guryaha iyo ammooniya ama nadiifiye kasta oo kale.**
- **Milanada aalkoloda** (ugu yaraan 70% aalkolo ah) ayaa la adeegsan karaa haddii ay sagxaddu ku habboon tahay
- Badeecooyinka leh [sheegashooyinka cudurrada fayraska soo baxaya ee ay oggolaatay EPA](#) ayaa la filayaa in ay si wax-ku-ool ah wax uga qabtaan cudurka COVID-19 iyada oo lagu saleynayo xogta fayrasyada adag in la dilo. Raac tilmaamaha soosaaraha ee loogu talagalay dhammaan badeecooyinka nadaafadda iyo jeermis-dilidda (tusaale, ribnaanta, sida loo adeegsado, iyo waqtiga xiriirka, iwm.).

Diyaari milan warankiilo barxan adiga oo ku qasaya:

- 5 qaadada shaaha oo warankiilo ah (1/3 koob) hal galoon oo biyo ah ama
- 4 qaadada shaaha oo warankiilo ah rubuc galoon biyo ah

- Loogu talagalay **sagxadaha jilicsan (daldaloolla)** sida dhulka lagu goglay roogga, kaabadka, iyo daahyada ka saar wasakhda muuqata haddii ay jirto ka-dibna ku nadiifi nadiifiyeyaasha ku habboon ee loogu talagalay in loo adeegsado sagxadahan. Ka-dib nadiifinta:
 - Haddii agabka la dhaqi karo, agabka u dhaq sida ku cad tilmaamaha soosaaraha iyada oo la adeegsanayo hagaajinta biyo sida ugu habboon u diirran oo loogu talagalay agabka ka-dibna agabka gebi ahaanba qalaji.
 - Haddii agabka aan la dhaqi karin, adeegso badeecooyinka leh sheegashooyinka cudurrada fayraska soo baxaya ee ay oggolaatay EPA ee ku habboon sagxadaha daldaloolla.

Loogu talagalay Go'yada, Dharka iyo Agabka Kale ee Geli Kara Makiinadda Dharka Lagu

Dhaqdo:

- Agabka u dhaq si waafaqsan tilmaamaha soosaaraha. Haddii ay suuragal tahay, agabka dhaq adiga oo adeegsanaya hagaajinta biyo sida ugu habboon u diirran ee loogu talagalay agabka ka-dibna agabka gebi ahaanba qalaji. Dharka dhaqmada u baahan ee wasakhda ah ee gaaray qof xannuunsan ayaa lala dhaqi karaa dharka dadka kale.
- **Ha ruxin dharka wasakhda ahn;** tani waxay yareyn kartaa suuragalnimada in fayraska uu hawada ku faafo.
- **Nadiifi oo jeermiska ka dil saladaha ama gaari-gacannada lagu qaado dharka wasakhda ah ee dhaqmada u baahan** adiga oo raacaya tilmaamaha kor ku xusan ee loogu talagalay sagxadaha jilicsan ama adag.



Qalabka Difaaca Qofka (PPE) iyo nadaafadda gacanta:

- Haddii aad nadiifinayso meelo uu jeermiga gaaray, xiro **af-xir, gacmo-gashiyo adeegsiga ka-dib la tuuri karo, iyo dhaaraan** oo loogu talagalay dhamman hawlaha hannaanka nadaafadda, oo ay ka mid tahay gacan ku qabashada qashinka.
 - Gacmo-gashiyada iyo dhaaraanka waa in ay la jaanqaadaan badeecooyinka jeermis-dilka ee la adeegsanayo.
- PPE dheeraad ah (sida difaaca indhaha) **ayaa loo baahan karaa** oo ku saleysan badeecooyinka nadaafadda/jeermis-dilka la adeegsanayao iyo haddii ay jirto halis firdhasho.

- **Gacmo-gashiyada iyo dhaaraanka la adeegsado waa in la isaga saaro si taxaddar leh** si looga fogaado wasakhowga xirtaha iyo goobta ku hareersan. Gacmaha si fiicanu **dhaq** ka-dib marka aad iska saarto PPE.
- **Si degdeg ah ugu sheeg dillaaca ama jabitaanka qalabka PPE** (tusaale, dillaaca gacmo-gashiyada) ama gaaris kasta oo suuragal ah ee fayraska, kormeerahaaga.
- **Inta badan nadiifi gacmahaaga, oo ay ka mid yihiin isla-markiiba marka aad iska saarto iyo ka-dib marka aad xiriir la yeelato qof xannuunsan**, adiga oo gacmaha ku dhaqaya biyo iyo saabuun ilaa iyo 20 ilbiriqsi. Haddii biyo iyo saabuun aan la heli karin oo gacmaha aysan wasakh ka muuqan, gacmo nadiifiye aalkolo ka sameysan oo ay ku jirto **aalkol 60%-95%** ayaa la adeegsan karaa.
 - **Haseyeeshee, haddii gacmaha ay wasakh ka muuqato, had iyo jeer gacmaha ku dhaq biyo iyo saabuun.**
- **Raac tallaabooyinka ka hortagga caadiga ah**, oo ay ka mid tahay in marar badan la nadiifiyo gacmaha iyo ka fogaanshaha in gacmo aan dhaqayn lagu taabto indhaha, sanko, ama afka.
- Intaa waxaa dheer in **waqtiyada muhiimka ah in gacmaha la dhaqdo** ay ka mid yihiin:
 - Ka-dib marka qofka duufsado, qufaco, ama hindhiso
 - Ka-dib marka musqusha la adeegsado
 - Ka hor inta aan wax la cunin ama cunto la diyaarin
 - Ka-dib marka xiriir lala yeesho xayawaannada ama xayawaannada rabbaayada ah
 - Ka hor iyo ka-dib bixinta daryeelka caadiga ah ee loogu talagalay qof kale oo caawimaad u baahan (tusaale, cunug)

Fadlan u noqo [**dhabbetusayaasha dhammeystiran ee CDC \(talooyinka ku meelgaarka ah\)**](#), iyo [**liiska Jeermis-dilayaasha ay oggolaatay EPA**](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.